Ministry of Justice and Security

Waxaa lagugu tuhunsanyahay gaf dambi

Boolis ayaa ku xiray misena gudaha saldhiga booliska kugu xiray ama adeege dambi baaris kale. Ama waxaa lagugu wacay wareysi. Boggan warbixineed ayaa sharraxaya xuquuqahaagu waxey yihiin iyo waxa dhici doona marka lagu wareysto.

Somalisch

Mar walba ee warbixinta boggan ay carabawdo 'booliska' waxey kaloo la micne noqon kartaa adeeg kale oo baaris.

Su'aalo?

Fadlan si taxaddar leh u akhri warbixinta boggan. Haddii aad wax su'aalo ah qabto kadib markaad akhriso, fadlan weydso garyaqaan, booliska ama qof kale oo adeeg baare ah ee markaa kushuqulka le kiiskaaga

Wixii warbixin intaas dheer, booqo shabakada Caawimada Sharciga ah iyo Xarunta La talinta (www.juridischloket.nl, oo kaliya lagu heli karo afka Dhajka), ama ka wac 0900 8020 (€0.10 daqiiqadii). Waxaad wici kartaa Caawimada Sharciga ah iyo Xarunta La talinta laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcaha inta udhexeysa 9:00 a.m iyo 5:00 p.m.

Haddii aadan fahmeyn misena kuhadli karin luqada Dhajka heer in kugu filan

Haddii aadan fahmeyn misena kuhadli karin luqada Dhajka heer in kugu filan, waxaad xaq uleedahay turjubaan. Tani waxey ahaan doontaa bilaash. Waxaad kaloo xaq ulahaan doonta dokumintiyo qaar oo laguu tarjumay, sida amarka xariga booliska iyo wicitaanada.

Haddii booliska kuugu yeereen iney wareysi kula yeeshaan

Haddii booliska kuugu yeereen iney wareysi kula yeeshaan sabab ah in lagugu tuhmay gaf dambi ah, waxaa lagaaga baahnaan doonaa inaad waxaad tahay is sheegto kahor wareysiga. Sidaa darteed waa inaad la timaadaa aqoonsigaaga, sida baasaboor ama Aqoonsiga Yurubiyaan ah.

Waxaad la xiriiri kartaa garyaqaan kahor inta aan lagu wareysan. Garyaqaanku wuxuu kusiin karaa warbixin iyo talo sharci ah, isla markaana xaadir ahaan kara inta lagu guda jiro wareysiga. Tani waxaa si dheeraad ah lagu sharraxay xaga hoose. Haddii shakhsi ahaantaada aad habeysatay garyaqaan, waa inaad bixisaa kharashka ku baxaya.

Haddii boolis ku xiray oo xero boolis lagugu kaxeeyay

Haddii boolis ku xiray sabab ah in lagugu tuhmay gaf dambi, waxaa ku wareysanaya boolis. Tani micneheedu waa in booliska ay su'aalo ku weydiiyaan.

Xuquuqahaaga:

- Waxaad xaq uleedahay in lagu ogeysiiyo gafka dambi ee lagugu tuhunsan yahay.
- Waxaad xaq uleedahay inaadan ka jawaabin su'aalaha (xaq aamusnaan)
- Waxaad xaq uleedahay si kali ah inaad ula hadasho garyaqaan kahor wareysigaaga ugu horeeya iyo wareysiyada xiga.
- Waxaad xaq uleedahay inuu kula joogo garyaqaan inta lagu guda jiro wareysiga si uu kuu siiyo caawimo sharci ah.
- Haddii aadan fahmin wax, fadlan usheeg booliska. Fadlan sidoo kale usheeg booliska haddii aad xanuunsato, oo aad rabto inaad la hadasho dhakhtar ama aad si dagdag ah ugu baahato daryeel caafimaad ama daweyn.
- Haddii xeer ilaaliyaha guud ama kuxigeenka xeer ilaaliyaha guud uu go'aansado inaad joogto xerado booliska, waxaad xaq uleedahay inaad ku war galiso qof aad garaneysid (sida xubin qoys ama qof guriga kula dagan) inaad xerada booliska ku xirantahay. Xaaladaha qaarkood, xeer ilaahaha guud ama ku xigeenka xeer ilaaliyaha guud wey go'aansan karaan in si kumeel gaar ah lagaaga sii daayo xerada booliska. Isga/iyada ayaa dabadeed kugu wargalin kara midan.
- Haddii aadan heysan dhalashada Dhajka, waad weydiisan kartaa in qunsulka wadankaaga ama safaarada lagu war galiyo inaad xero boolis ku xirantahay.
- Waxaad xaq uleedahay inaad aragto dukumintiyada diyaarka ah ee kiiskaaga. Sikastaba ha ahaatee, xeer ilaaliyaha guud wuxuu xaaladaha qaar go'aansan karaa in aan la ogoleyn. Isaga/iyada ayaan kugu war galinaya midan.

Ilaa intee ayey booliska kugu heyn karaan xerada?

- Iyadoo loo eegayo gafka lagugu tuhmay, booliska waxey kugu heyn karaan xerada ilaa 90 saacadood (3 maalmood iyo 18 saacadood).
- Haddii wareysigu ubaahdo in xarigaaga la kordhiyo, maxkamada ayaa go'aan ka gaareysa in la kordhiyo iyo in kale. Haddii aadan ku raacsaneyn xarigaaga ama go'aanka maxkamadeed ah kordhinta in lagugu sii hayo xerada booliska, waad weydiisan kartaa garyaqaan kaaga talo.

Xaq ah in garyaqaan caawin sharci ah ku siiyo

Waxaad xaq uleedahay inaad kulan qarsoon layeelato garyaqaan ilaa 30 daqiiqadood **kahor** inta booliska ku wareysan. Kulankan waxaa la kordhin karaa ilaa 30 daqiiqadood haddii ay tahay lagama maarmaan. In garyaqaan laguu diyaariyo waxey ku xirantahay qatarta gafka dambi ee lagugu tuhmay.

- Haddii lagugu tuhmay gaf dambi oo aad qatar u ah ciqaabtiisuna tahay xabsi muddo 12 sannadood ama kabadan (sida dil ama dil aan ulakac aheyn), ama haddii booliska kuu baqaan sabab ah xaalada xanuunkaaga dhimirka, garyaqaan kula hadla ayaa sida ugu dhakhsiyaha badan laguugu qabanayaa. Tani waxey ahaan doontaa bilaash.
- Haddii aadn rabin inaad lakulanto garyaqaan, fadlan si cad ugu sheeg garyaqaanka.
- Haddii lagugu tuhmay gaf dambi oo qatar u ah - mid laguu xirikaro kahor intaan lagu maxkamadeyn (sida xatooyo) - waad dooran kartaa in garyaqaan laguu qabto si aad ula hadasho kahor inta booliska aysan ku wareysan. Haddii aad rabto, booliska ayaan kuu garyaqaan kuu qaban kara. Tani waxey ahaan doontaa bilaash.
- Haddii lagugu tuhmo gaf aan qatar aheyn, waad dooran kartaa inaad lahadasho garyaqaan. Waxaad markaas ubaahaneysaa inaad si shakhsi ahaaneed ula xiriirto garyaqaan mise dhiibto kharashki kubixi lahaa lakulanka garyaqaanka.

Haddii aadn hubin mid kamid ah xaaladahan kugu wajahan, weydii waxa soo socda;

- Ma garyaqaan ayaa si toos ah la iigu qabanayaa, ama ma dooran karaa haddii aan rabo garyaqaan?
- Ma anigaa bixin doona kharashaadka caawimada garyaqaanka sharciga?

Haddii aad garaneyso garyaqaan ku caawiya, falan kuwargali booliska arintan.

Haddii garyaqaankaaga uusan ka diiwaan gashaneyn Hey'ada Caawinta Sharciga, waxaa khasab kugu noqoneysa inaad bixi wixii kharash kubixi lahaa. Haddii aad booliska siiso xog shakhsiyadeed si laguugu qabto garyaqaan, xogtan shakhsiyadeed waxaa howlgalin doona Hey'ada Caawinta Sharciga

Sidoo kale waxaad xaq uleedahay in uu garyaqaan kula joogo inta lagu guda jiro wareysiga booliska. Haddii lagugu tuhmay gaf dambi oo qatar ah, caawintan sharciga waxey ahaan doontaa bilaash. Haddii lagugu tuhmay gaf dambi oo aan qatar aheyn, kharashka adigaa iska bixin doona.

Fadlan sidoo kale ogown in

- Haddii aad sheegtay inaadan uga baahneyn garyaqaan kaaga caawin sharci, waad badali kartaa maskaxdaada.
- Haddii aad sheegtay inaad garyaqaan uga baahan tahay caawin sharci, booliska looma ogola iney bilaabaan wareysiga kahor intaadan lahadlin garyaqaan. Kaliya waxaa laga saari karaa marka dagdag siimo lagama maarmaan ah ay jirto oo markaas wareysiga uu isla markiiba bilowdo, sida xaalad nafta halis galisa.

Fadlan madaxa ku hay iney waqti qaadan karto kahor imaashaha garyaqaan.Nidaam ahaan, garyaqaanku waa inuu ku yimaado labo saacadood gudohood kabid codsiga garyaqaan ee booliska.

Muxuu garyaqaan kuu qaban karaa kahor intey boolisku ku wareysan?

Kahor intaan lagu wareysan, garyaqaanku wuxuu kugu caawin karaa waxa soo socda:

- kuu sharraxo dambiga lagugu tuhmay ee iyo waxa ka iman kara;
- inuu kusiiyo talo sharci;
- Kuu sharraxo habka wareysiga booliska;
- kuu sharraxo xuquuqaha iyo waajibaadkaaga inta lagu guda jiro wareysiga;
- la xiriiro qoyskaaga ama qofka aad ushaqeyso si uu ugu wargaliyo xaaladaada, waa haddii aad rabto;

Booliska ma dhageysan doonaan kulanka garyaqaan kaaga. Wax walba ee aad ka hadashaan waxey ahaan doonaa mid qarsoodi ah. Garyaqaan kaaga looma ogola inuu booliska la hadlo, xeer ilaaliyaha ama dacwad oogaha ama qof kale ee aad ka hadashay, ilaa aad fasax siiyo mooyee.

Muxuu garyaqaan qabtaa inta lagu guda jiro wareysi boolis?

- Garyaqaanku wuxuu sameyn karaa fal celin ama inuu su'aal weydiiyo askariga ku wareysanaya bilowga iyo dhamaadka wareysiga.
- Inta lagu guda jirro wareysiga, adiga ama garyaqaan kaaga ayaa dalban kara in la hakiyo wareysiga si aad ula tashato garyaqaan kaaga. Haddii aad sidan sameyso marar badan, askariga ku wareysanaya wuu diidi karaa codsiga noocaas ah.
- Haddii aadan fahmin su'aalo ama fal celino, haddii aad dareento cadaadis inta lagu guda jiro wareysiga, ama haddii aadan wadi karin wareysiga sababo caafimaad dartood, garyaqaan kaaga ayaa ku wargalin kara askari ku wareysanaya xaaladan.

Muxuu garyaqaan qaban karaa kadib wareysi askari?

- Wareysiga kadib, adiga iyo garyaqaan kaaga waxaad arki kartaa warbixinta rasmiga ah ee wareysiga isla markaana wargaliya booliska haddii khaladaad kujiraan warbixinta.
- Waxaa dheer, garyaqaan kaagu wuxuu kugu wargalin karaa waxa aad sameyn karto haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka kordhinta in lagugu sii hayo saldhiga.

Maxaa dhacaya marki lagu wareysto?

Wareysiga kadib, xeer ilaaliyaha guud ayaa go'aansan doona kiiskaaga. Xeer ilaaliyaha wuxuu sameyn karaa mid kamid ah go'aamada soo socda.

Kiiskaaga in la xiro

Kiiskaaga waa la xiri karaa. Tani waxey micne ka tahay in aan lagu xukumin. Marka kiiskaaga la xiro, waxey ka tarjumeysaa in xaalado dhowr ah aad u hogaan santaa.

Tusaale, waxaa lagaa xannibi karaa inaad la xiriirto dhibanaha iyo/ama in lagaa dhigo qof dusha lagala socdo si leh shuruudo khaas ah. Haddii aadn u hogaansamin shuruudahan ama aad sameyso gaf dambi kale, waa laguu yeeri karaa in aad ka hor muuqato maxkamad kiiskii lagaa xiray.

Amarka ciqaabta

Haddii xeer ilaaliyaha ogaado inaad dambiile tahay, Xeer ilaaliyaha wuxuu kugu xukumi karaa amar ciqaab. Haddii lagugu xukumo amar ciqaab, tani waxey keeni kartaa in lagu ganaaxo ama lagaaga baahdo inaad sameyso adeeg bulsho. ama waaa lagaa xannibi karaa wadista gawaarida iyo/ama waxaa lagugu soo rogi karaa culeys habdhaqan (sida xannibid ah inaad laxiriirto dhibanaha ama in lagaaga baahdo inaad ku ekaato adeega tijaabada).

Haddii lagu ganaaxo, waxaad dhiibi kartaa ganaaxa isla markiiba adigoo wali kujira saldhiga. Si kastaba ha ahaatee, kaliya waxaad ganaaxa dhiibi kartaa kadib markaad hesho fursad inaad kala hadasho garyaqaan. Hadii aad ganaaxa dhiibto isla markiiba, waxey micne ka tahay kiiska lagugu soo oogay in la xiray.

Haddii xeeri ilaaliyaha go'aansado amar ciqaab oo ah xayiraad xaga wadista gawaarida ah ama adeeg bulsho, waxaad la yeelan doontaa xeer ilaaliyaha dhageysi maxkamad. Waad la tashan kartaa garyaqaan kahor dhageysiga, garyaqaankuna wuxuu ahaan doonaa mid xaadir ku ah inta lagu guda jiro dhageysiga. Hadii ay tahay lagama maarmaan, dhageysiga waa la taariikheyn karaa si loo xaqiijiyo joogista garyaqaan kaaga. Dhageysiga video ahaan wuu udhici karaa.

Bayaan dibada maxkamada

Kiisaska qaar, xeer ilaaliyaha wuxuu fidin karaa bayan maxkamada banaankeeda Bayaanka maxkamada banaankeeda waxey wadataa shuruudo. Haddii aad u hogaansanto shuruudahan, waxaa iska fogeyneysaa sii socoshada gaf dambi.Bayaanka maxkamada banaankeeda waxey lifaaq ku noqon kartaa mid kamid ah waxa soo socda: Bixin tiro lacag, Bixinta magdhawga dhibanaha, ama ka tanaasulid lahaanshaha walxaha booliska qabtay. Haddii aad ku guul dareysato uhogaansiga mid kamid ah shuruudahan xilliga kama dambeysta, waa inaad maxkamada kasoo hor muuqataa. Bayaanka dibada maxkamada waxaa kaloo lagu bixin karaa si dhakhsi ah saldhiga booliska. Tani waxey ka dhaadhicin u tahay, tusaale, hadii aadan ku laheyn adrees joogto ama kumeel gaar ah Netherlands.

Kiis maxkamad

Xeer ilaaliyaha wuxuu go'aansan karaa inuu kiis kaaga horkeeno maxkamada. Kadib markaas waxaa ka heli doontaa uyeeridaada Xeer Ilaaliyaha Adeega. Uyeerida waxey carabaabi doontaa dambiga lagugu soo eedeeyay, iyo wakhtiga iyo goobta maxkamad dhageysigaaga.

Khelaya tabinta si dijitaal ah mijn.overheid.nl

Waad dooran kartaa inaad ka hesho tabinta Xeer Ilaaliyaha Adeega ee kiiskaaga qaab dijitaalka ah via mijn.overheid.nl, shabakada Dowlada Dajka. Haddii aad rabto inaad tabintan uhesho si dijitaal ah, ka gal Berichtenbox mijn.overheid.nl adigoo isticmaalaya DigiD kaaga, aad 'Instellingen' (sitinka) oo sax saar sanduuqa 'Opernbaar Ministerie' (Xeer Ilaaliyaha Adeega)

In aad heleysid rikoor dambiyeed

Haddii aad aqbasho amar ciqaab, ama bayan maxkamada banaankeeda kuxallin oo fidiyay xeer ilaaliyaha, waxaa lagalinayaa rikoorka cadaalada, taasoo micno ka ah inaad yeelan doonto rikoor dambi. Ka natiijo ahaan, waxaa dhib kugu noqon karta inaad hesho shahaadada akhlaakhda wanaagan (VOG) taasoo looga baahanyahay shaqooyin iyo iskaa wax uqabo. Garyaqaan ayaa kugu wargalin kara iyadoo faahfaahsan arrintan.

Intaa waxaa dheer, warqad ayaa diyaar kuugu ahaan doonta saldhiga booliska oo sharraxeysa cawaaqibka. Wixii faahfaahin intaas ka badan oo kusaabsan VOG, aad: www.justis.nl/producten/vog.

Daabacaadii:
Wasaarada Cadaalada iyo Amniga

Ministry of Justice and Security
PO Box 20301 | 2500 EH The Hague

Maarso 2022 | 22402696

Wax xuquuq ah lagama soo saari karo waxa kujira macluumaadka xaashidan.